



Cudurka Coronavirus 2019

COVID-19

Adeegsiga Booqashada khadka taleefanka
(Telehealth) iyo Laymanka Kalkaalinta

Haddii aad qabto astaamaha cudurka COVID-19 (qandho, qufac, neefta oo kugu yaraata), ka fakar inaad booqato telehealth ama wacdo laynka talada kalkaalinta ka hor intaadan raadsan daryeelka tooska aad u tagayso xarunta. Waydiiso dhakhtarkaaga rasmiga ah haduu baxsho booqashada dhanka khadka taleefanka ah (telehealth), ama wac mid kamid ah laymanka kalkaalinta ee Colorado.

Haddii aad qabto xaadal caafimaad oo degdeg ah, wac 911. U sheeg qofka taleefanka kaa qabta astaamaha cudurkaaga. Hadday suuragal tahay, gasho maas garaatiga wajiga kahor intaan adeegyada gurmadka caafimaadku kusoo gaarin ama isla marka ay kuu yimaadaan.

Waa maxay farqiga u dhaxeeya telehealth iyo laymanka kalkaalinta?

- Telehealth waa aalad aad dhakhtarka kula xariirayso wicitaan muuqaal toos ah. Adoo adeegsanaaya telehealth, dhakhtarka ayaa ku baari kara, kusiin kara qorshe daawo oo ku haboon baahiyahaaga, kugula talinaaya in lagaa baaro cudurka COVID-19 hadday macquul tahay, ama uu kuu qoro daawooyin. Waqtii xadirkaan, lama hayo talaal looga hortago cudurka COVID-19.
- Inaad wacdo laynka kalkaalintu waxay ku siinaynaa xog dheeraad ah oo la xariirta talaabada xigta ee aad qaadayso. Kalkalisadu waxay kaa caawin kartaa go'aaminta marka aad wacayo dhakhtarkaaga ama booqanayso xarunta daryeelka caafimaadka, inaad fahanto daawooyinkaaga, ama waxay ku siinayaan xog dheeraad ah oo la xariirta daryeelka kahortaga ah.

Waa maxay sababta aan u adeegsanaayo telehealth?

- Telehealth wuxuu yarayn karaa khatarta aad u gali karto inaad xanuunsato adoo yaraynaaya la kulanka dadka kale.
- Telehealth wuxuu kaa caawin karaa helitaanka talo caafimaad oo boobsiis ah.
- Markaad adeegsato Telehealth, waxaad ka caawinaysaa isbitaalka inay adeegyo u fidiyaan dadka aadka u xanuunsan. waxaad sidoo kale ka hortagaysaa faafida cudurka COVID-19 oo ku dhex faafa bulshadaada.

Ma qarash dheeraad ah ayaa iiga baxaaya adeegsiga telehealth kaasoo ka badan kan iga baxa markaan dhakhtarka toos ugu tago?

- Gudaha Colorado, adeegga telehealth waxaa caymis ku bixiya dhammaan shirkadaha caymiska. Si aad xog dheeri ah u hesho, la xariir shirkadaada caymiska si toos ah.
- Inaad wacdo laynka kalkaalinta ayaa caadiyan ah mid bilaash ah laakiin laymanka kalkaalinta qaar ayaa lahaan kara xeerar la xariira cidda soo wici karta.
- Ayadoo la raacaayo tilmaanta Colorado's Department of Regulatory Agencies (Wakaaladaha Waaxda Sharciyada ee Colorado), lacagaha qayb ahaan ay macamaiishu baxshaan ee caymisyada ayaa laga dhaafayaa marka la bixinaayo adeegyada cudurka COVID-19 ee caymisku dabooloo ee telehealth lana

sinaayo dadka leh caymiska gaarka loo leeyahay. Wixii la xariira booqashooyinka telehealth ee aan cudurka la xariirin, wali waxaad bixin doontaa qaybta kaaga soo aada caymiska.

- Booqashooyinka Telehealth waxaa ku baxa isla qarashka kaaga baxa markaad dhakhtarka toos ugu tagto bukaanada ku jira caymisyada Medicaid iyo Medicare.
- Haddii aadan haysan caymin caafimaad ama dhakhtar daryeel aasaasi ah ku siiya, waxaa jiro shirkado badan oo baxsha caafimaadka khadka taleefanka oo adeeggaas kuugu qabanaaya lacagtaada. Booqashooyinkaan waxaa caadiyan ku baxa qarash u dhaxeeya \$20 ilaa \$75 halkii booqashaba.

Xagee ayaan ka heli karaa liiska dhakhaatiirta telehealth iyo layamanka kalkaalinta gudaha Colorado?

- Shirkado badan oo baxsha caymiska caafimaadka ayaa baxsha adeegyada telehealth iyo layamanka kalkaalinta oo ay siiyan macamaiishooda. Webseetka waaxda caafimaadka ee gobalka ayaa xog ka bixinaaya sida balamo looga qabsado dhakhaatiirta kala duwan ee ka shaqeeya adeegga telehealth gudaha Colorado.
- Hel liiska layamanka kalkaalinta ood ka helayo websetka waaxda caafimaadka.
- Haddii aadan haysan caymin caafimaad ama dhakhtar daryeel aasaasi ah ku siiya, waxaa jiro shirkado badan oo baxsha caafimaadka khadka taleefanka oo adeeggaas kuugu qabanaaya lacagtaada. Booqashooyinkaan waxaa caadiyan ku baxa qarash u dhaxeeya \$20 ilaa \$75 halkii booqashaba.

Sidee ayaan u isticmaalaya telehealth?

- Booqo webseetka telehealth iskana qor/gal barta si aad u qabsato balan.
- Soo dagso software ama app yada loo adeegsado booqashada.
- Haddii aad haysato qalabka cabira heer kulka, qalabka cabira heerka wadnaha, qalabka cabira dhiig karka, qalabka cabira sonkorta dhiiga, ama qalab kale oo caafimaad, soo qaado marka aad galayso booqashada aalada telehealth.
- Fariiso qol nal fiican leh si markaas dhakhtarkaagu si fiican kuugu arko.
- Hadday suuragal tahay, kusoo biir booqashada daqiiqado ka hor si aad u hubiso in cod baahiyahaaga iyo kaamaradaada ku xiran aaladaada ay si fiican u shaqaynayaan.